

# TILMAAN-BIXIYAHA CARRUURTA DA'YARTA AH EE AAN LA WEHELIN EE MAGANGELYO WAYDIISTA WADANKA BILJIM



## **Buug -yarahan iyo dhammaan daabacaadaha afka ayaa laga heli karaa mareegaha CGRS:**

This brochure and all language editions are available on the website of the CGRS:

[www.cgrs.be/en/publications](http://www.cgrs.be/en/publications)

### **Publisher:**

Office of the Commissioner General for Refugees and Stateless Persons (CGRS)  
Rue Ernest Blerot 39  
1070 BRUSSELS

### **Edition:**

August 2025



**Co-funded by the  
European Union**

# TUSMO

<b>SALAAAN</b>	<b>4</b>
<b>NIDAAMKA MAGANGELYO</b>	<b>6</b>

1

WAA MAXAY NOOCA BADBAADADA CAALAMIGA AH EE AAD KA HELI KARTO BILJIM?	8
LABO NOOC OO MAGANGELYO AH	9
YAA AH QAXOOTI?	10
WAA MAXAY MACNAHA SHARCIGA BADBAADADA DHIMAN?	11

2

AQOONSIGAAGA IYO DIIWAANGELINTAADA SIDA QAANGAARKA YAR EE AAN LALA SOCON	12
WAXAAD TAHAY DA'YAR AJNABI AH OO AAN LA WEHELIN	13
DA'DAADA AYAA LA QIIMEYNAYAA	14
MAS'UUL AYAA LAGUU XILSAARAYA	15
WAXAA LAGU DEJINAYAA XARUN SOO DHAWEYN	16
XAFIISKA SOCDAALKA AYAA WAXBIXIN KAA QAADAYA, WUXUUNA KAA BUUXINAYAA FOOM SU'AALO AH	17

3

HABSOCODKAAGA MAGANGALYO EE XAFIISKA WAKIILKA GUUD EE QAXOOTIGA IYO DADKA WADAN LA'AANTA AH	18
QABIIR AYAA BAARITAAN KU SAMAYNAYA CODSIGAAGA	19
WAREYSTAHA AYAA KULA YEELANAYA WAREYSI FAAHFAAHSAN	20
MAXAAD KA FILAN KARTAA MUDDADA UU WAREYSIGA KA SOCDO CGRS?	22
MUXUU KAA FILAN KARAA WAREYSTAHAINTA LAGU GUDO JIRO WAREYSIGA?	23
BAARITAANKA CODSIGAAGA MAGANGALYO-DOONKA	24
GO'AANKA KU SAABSAN CODSIGAAGA MAGANGELYO	25
DIIDMO: CGRS WAY DIIDAY CODISGAAGII MAGANGELYO. MAXAA XIGGAYA?	26
RACFAAN KA DHAN AH GO'AAN DIIDMO AH	26
OGOLLAANSHO: WAXAA LAGUU AQOONSADAY QAXOOTI AHAAN	27
MUXUU YAHAY SHARCIGA QAXOOTINIMADA?	27
OGGOLAANSHO: WAXAA LAGU SIIYAY SHARCIGA BADBAADADA DHIMAN	28
WAA MAXAY SHARCIGA BADBAADADA DHIMAN?	28

<b>XIRIIR</b>	<b>30</b>
---------------	-----------

# SALAAAN

Ilmo walba waa uu nugulyahay/jilicsanyahay. Haba ugu sii darnaadaane da'yarta ajnabiga ah ee aan la wehelin. Badankood waxa ay iyagoo kaligood ah yimaadaan dal aysan aqoon, oo leh dhaqan kale kaddib marka ay soo galaan safar argagax leh si ay u waydiistaan magangelyo. Waxaa xittaa ku adkaata in sheekadooda magangelyo ay u sheegaan si cad oo la fahmo karo.

Sababtaan darded ayaa waxa ay CGRS u samaysay nidaam gaar ah oo baaritaan loogu samaynayo codsiyada magangelyo ee da'yarta aan la wehelin.

Adiggu waxaa tahay da'yarta aan la wehelin oo magangelyo waydiisanaya Biljim. Tilmaan-bixiyahan wuxuu kuu sharaxayaa tallaabooyinka kala duwan ee hababka magangelyo. Dhamaan da'yarta aan la wehelin waxay helayaan tilmaan-bixiyahan isla maalinta ay magangelyada waydiistaan xafiiska socdaalka.

## Sii Ogoow Inbadan

Halkaan waxad ka heli kartaa qodobada waaweyn ee ku jira Tilmaan-bixiyahan oo kooban:


[www.cgrs.be/en/asylum/children-asylum-procedure](http://www.cgrs.be/en/asylum/children-asylum-procedure)

Websiteka CGRS waxaad sidoo ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamka magangelyo ee Biljim.



Buufinkaan  
cagaaran waa  
waxyaabaha aad u  
baahantahay inaad  
xasuusnaato.

Buufinkaan buluuga  
waa tilmaamayaal  
websiteyo muhiim ah.



# NIDAAMKA MAGANGELYO



DIWAANGELIN




WAREYSI



fedasil

SOO DHAWEYN  
IYO TAAGEERO



1

WAA MAXAY NOOCA  
BADBAADADA  
CAALAMIGA AH EE AAD  
KA HELI KARTO BILJIM?

---



HAGAHA CARRURTA AAN LALA SOCON

8

# LABO NOOC OO MAGANGELYO AH



Waxaad magangelyo ka codsatay Biljim. Tani macnaheedu waxaa weeye in aad waydiisatay dowlada Biljim inay ku badbaadiso sababtoo ah waxaad cabsi weyn ka qabtaa dhibaatooyin ba'an oo ka jira wadankaaga ama meeshii aad deganayd. Dhibaatooyinkaas dartood, waxaad aaminsantahay in aadan dalkaagii dib ugu laaban karin. Biljim waxa ay bixisaa labo nooc oo magangelyo ah: Sharciga qaxootinimada iyo sharciga badbaadada dhiman.



# YAA AH QAXOOTI?

---

Biljim waxa ay sixiixday axdiga Jineefa ama axdiga qaxootiga. Heshiiskan caalamiga ah ayaa waxa uu saarayaa Biljim waajibaad in ay siiso badbaado dadka la soo saxariiriyey ama ka cabsi qaba in lagu saxariiryo wadankoodii ama wadankii ay daganaayeen. Caddibaadu waxa ay u dhici kartaa dhawr siyaabood dartood:

- fekerkaaga siyaasadeed, ama kuwa qoyskaaga
- diintaada
- isirkaaga
- Jinsiyadaada
- ka mid ahaanshahaaga ‘Koox bulsho gaar ah’. ‘Koox bulsho gaar ah’ waa koox dad ah oo wadaaga sifo guud oo aanay badeli karin. Sifahaa s ay wadaagaan darteed, Badi dadka iyo maamulka wadankaaga waxa ay kuula dhaqmaan si cadownimo leh. Tusaale ka mid ah tan waxaa noqon kara qof loo caddibayo in uu yahay khaniis.

Haddii aad wadankaaga ka soo tagtay ama aadan dib ugu laaban karin halkaas, hal ama dhawr sababood oo kamid ah kuwa kor ku xusan, waxaa laga yaabaa in Biljim ay ku siiso sharciga qaxootinimo.



# WAA MAXAY MACNAHA SHARCIGA BADBAADADA DHIMAN?



Haddii aan lagu siin sharciga qaxootinimo sabab la xiriirta xaaladaada. CGRS waxaa ay baaritaan ku samaynaysaa in aad xaq u leedahay sharciga badbaadada dhiman.

CGRS waxa ay sharciga badbaadada dhiman ku siinaysaa haddii aad khatar dhab ah oo waxyeelo daran ah kala kulmayso wadankaaga. Waxyeelo daran waxa kamid noqon kara:

- xukun dil ah ama ciqaab ah
- jirdil ama hab dhaqan ka baxsan bini aadamnimada ama xaqiraad
- khatar halis ah oo kaga imaan karta haddii uu dhaco dagaal hubeysan.

2

AQOONSIGAAGA IYO  
DIIWAANGELINTAADA  
SIDA QAANGAARKA YAR  
EE AAN LALA SOCON

---



HAGAHA CARRURTA AAN LALA SOCON

# WAXAAD TAHAY DA'YAR AJNABI AH OO AAN LA WEHELIN

- haddii aad ka hooseyso 18
- haddii aad joogto biljim waalid la'aan ama mas'uul sharci ah la'aantiis
- haddii aad ka timid wadan ka baxsan midawga Yurub
- haddii aad magangalyo ka dalbato ama aad joogto Biljim adigoo aan haysan warqaddo deganaansho oo sharci ah.

Si iskaa ah ama iyadoo uu kula socdo mas'uulkaaga waad uga codsan kartaa magangelyo xafi iska socdaal ama xuduuda. Haddii aad kaligaa tahay xafiiska socdaalka waxa uu joogitaankaaga **ku wargelinayaa** adeegga qaabilsan mas'uul ka noqoshada.

Waaxda arimaha ajnabiga waxa ay kula buuxinaysaa xaashida macluumaadka si joogitaankaaga loogu wargelinayo adeegga qaabilsan mas'uul ka noqoshada in aad adigu si iskaa ah u timid Biljim. Adeegga qaabilsan mas'uul ka noqoshada wuxuu hubbinayaa in la dhawro xuquuqdaada sababtoo ah waxaad u baahantahay daryeel gaar ah ilmo ama da'yar ahaan.

## Sii Ogoow Inbadan


### DIB U NOQOSHO DALKAAGII

Haddii aad doonayso, waxaad dooran kartaa inaad si rasmi ah dib ugu laabato wadankaga, xittaa haddii aad codsatay magangelyo. waxaa laga yaabaa lagaa in caawinaoy diyaargarowga dib u laabashadaada iyo inta lagu gudo jiro safarka dib u laabashada. Rabbitaankaaga dib u laabasho waxaad kala hadli kartaa mas'uulkaaga ama shaqaalahaaga bulshada. Faahfaahin heeraad ah waxaad ka heli kartaa websitka:

[www.voluntaryreturn.be](http://www.voluntaryreturn.be)




# DA'DAADA AYAA LA QIIMEYNAYAA



Haddii uu jiro wax shaki ah oo la xiriira da'daada, laanta mas'uulka ah ayaa billaabaya **qiimeyn da'da** ah. Baaritaan caafimaad, raajo curcurka ah, kalxanta iyo ilkaha ah ayaa la qaadayaa. Raajadan waxaan ku qiimeyn karnaa qiyaas ahaan da'daada. Haddii aadan ku qanacsaneyn natiijada qiimeynta, racfaan ayaad ka qaadan kartaa golaha qaranka addigoo kaashanaya qareen muddo 60 maalmood gudahood ah. Haddii ay ku soo gabagabeeyaan addeega mas'uuliyadda in aadan ahayn da'yar ayadoo lagu saleynayo qiimeyntii da'da, ma heli doontid caawimaad qof mas'uul kaa noqda, waxaana laguula dhaqmayaa inaad tahay qof weyn.



## MAS'UUL AYAA LAGUU XILSAARAYA



Haddii aysan da'daadu shaki ku jirin ama qiimeynta da'da ay muujisay in aad tahay da'yar, addeega mas'uuliyada ayaa markiiba kuu xilsaaraya **mas'uul**. Mas'uul waa wakiilkaaga sharciga ah muddada aad joogto Biljim illaa aad ka gaarayo 18. Mas'uulnimadu waxay joogsanaysaa maalinta dhalashadaada ay ku buuxsanto 18 ama marka uu yimaado Biljim waalidkaa ama qof sharci ahaan mas'uul kaa ah. Mas'uulku wuxuu eegayaa sidii aad u heli lahayd qareen ku caawiya muddada geeddi socodka magangelyada. Wuxuu hubbinayaa in xuquuqdaadii Biljimka la dhawray, in aad aado iskuul, in waraaqaha kuu diyaarsanyihiin iyo iwm. Wuxuu kaa caawin doonaa in aad u diyaargarowdo codsigaagii magangaloy , wuxuuna kuu sharaxayaa waxa aad filan karto iyo wixii aadan filanayn. Mas'uulkaagu wuxuu goobjoog ka noqonayaa inta lagu guda jiro wareysiyada lagugula yeelanayo xafiiska socdaalka iyo xafiiska CGRS. Wuxuu eegayaa in wareystaha uu ixtiraamayo xaquuqdaada. Mudada wareysiga lagu guda jiro mas'uulku wuxuu sidoo kale bixin karaa macluumaad haddii uu doonayo, oo ku saabsan xaaladaada gaarka ah.

## WAXAA LAGU DEJINAYAA XARUN SOO DHAWEYN



Fedasil ayaa u qaabilsan soo dhaweynta dhamaan magangelyo doonka jooga Biljim. Tani waxa ay ka dhigantahay in Fedasil ay sidoo kale u xilsaarantahay soo dhaweyntaada da'yar aan la wehelin ahaan. Haddii aad leedahay qaraabo ku nool Biljim, waad dooran kartaa in aad iyaga la joogto.

Waxaad boos ka helaysaa xarun soo dhaweyn iyadoo lagu saleynayo baahiyahaaga iyadoo lagaa sooco dadka qaan gaarka ah. Dhamaan xarumaha soo dhaweynta ee Fedasil iyo hay'adaha ay iskaashadaan (sida Bisha Cas) waa xarumo furan, tani macneheedu waa in aad si xor ah u soo geli karto, ugana bixi karto xarunta, inta aad dhowrayso sharciga u yaala xarunta.

Waxaad joogi doontaa xarunta muddada geeddi socodka magangelyadaada. Haddii aadan hesho go'aan oo aad 18 jirsato, waxaa lagu wareejinayaa hoyga dadka qaan gaarka ah.

Da'yar ahaanshuhu waa in aad tagto iskuul, waxaa lagaa soo diwaangelinayaa iskuul xittaa haddii aad la nooshahay qaraabo, waa in aad tagto iskuul.

# XAFIISKA SOCDAALKA AYAA WAXBIXIN KAA QAADAYA, WUXUUNA KAA BUUXINAYAA FOOM SU'AALO AH

---

Xafiiska socdaalka ayaa idin casuumayso adiga iyo mas'uulkaaga. Ugu horeyn, wareystaha ayaa kaa qoraya **macluumaadkaga shaqsiga**. Dabadeed waxaad helaysaa fursad inaad wareysi kooban ku sharaxdo sababta aad u soo qaxday, U sheeg wareystaha sababta **aad dalkaagii uga soo tagtay**, iyo sababta aadan ugu laaban karin halkaas. Wareysigaan wuxuu ku saleysanyahay su'aalo horey loo diyaariyey. Waxaa muhiim ah inaad fasiraad cad ka bixiso xaaladaada iyo taariikh nololeedkaga. Tan macneheedu waxay tahay in ay waajib kugu tahay inaad bixiso macluumaad dhameystirin oo sax ah:

- aqoonsigaaga iyo Jinsiyadaada
- goobihii aad kusoo nooleed
- xubnaha qoyskaaga iyo goobaha ay ku noolaayeen
- iyo meesha ay hadda ku noolyihiin
- safarkaaga aad ku timid Bilji
- dhamaan sababihii aad waddankaaga uga soo tagtay.

Haddii aadan ku hadlin luuqadaha Nederlaanka iyo Faransiiska waxaa ku caawin doona turjubaan. Turjumaanka wuxuu turjumi doonaa wax walba oo adiga iyo qofka ku wareysanaya aad tirahdaan.

Wareystaha iyo turjubaanka waxaa xaddidaya hab xirfadeedka xifdinta sirta. **Tan macneheedu waxay tahay in xogta codsigaaga aysan la wadaagi karin cid saddexaad ama dowlada waddankaaga.** Kaddib wareysigan, xafiiska socdaalka wuxuu codsigaaga magangelyo u soo gudbin doonaa CGRS.

3

HABSOCODKAAGA  
MAGANGALYO EE XAFIISKA  
WAKIILKA GUUD EE  
QAXOOTIGA IYO DADKA  
WADAN LA'AANTA AH

---



HAGAHA CARRURTA AAN LALA SOCON

## QABIIR AYAA BAARITAAN KU SAMAYNAYA CODSIGAAGA



CGRS waxay leedahay koox **wareystayaal ah**, kuwaas oo qibrad u leh codsiyada magangelyo doonka ee da'yarta aan la wehelin. Wareystaha waa qofka baaritaanka ku samaynaya codsigaaga. Si fiican ayaa loo tababaray, wuxuuna leeyahay ama ay leedahay tababar gaar ah oo ku saabsan sida loo wareysto carruurta. wuxuu **wareysiga ku salaynayaa da'daada**, heerka tacliintaada iyo baahiyaha gaarka ah. Haddii ay lagama maarmaan noqoto wareystaha wuxuu isticmaalayaa agab dheeraad ah muddada wareysiga sida tusaale ahaan far shaxan iyo sawiro si uu kuugu caawiyo inaad u sharaxdo sheekada magangelyo sida ugu cad, ugu dhameystiran ee ugu macquulsan.

Guddiga guud ee qaxootiga iyo dadka aan wadamada lahayn ama ku xigeenadiisa ayaa masuul ka ah inay go'aan ka gaaraan codsigaaga.



# WAREYSTAHA AYAA KULA YEELANAYA WAREYSI FAAHFAAHSAN

Marka CGRS ay ka hesho faylkaaga magangalyo xafiiska socdaalka, CGRS waxay kugu casuumaysaa wareysi. Mas'uulkaaga iyo qareenkaaga waxay sidoo kale helayaan casuumaada wareysiga.


Wareysigaaga **waa qeybta ugu muhiimsan geedi socodka magangelyo**. Muddada wareysiga, waxaad fursad u helaysaa inaad sharaxaad ka bixiso sababta aad magangelyo uga codsatay Biljim.

Waxaad heli doontaa warqad casuumaad ah oo ay ku cadyihiin taariikhda iyo saacada wareysigaaga. Labadiinuba adiga iyo mas'uulkaaga **waa inaad soo xaadirtaan** wareysiga. Haddii sabab jirta darteed; tusaale ahaan sida inaad xanuunsantahay, oo sababtaas darteed aadan soo xaadiri karin wareysiga, mas'uulkaaga waa in uu ku soo wargeliyaa CGRS. Waxaa laga doonayaa 8 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la qorsheeyay wareysiga in uu dhaco. Waa in aad caddeyso maqnaanshahaaga. Dabadeed waxaad heli doontaa casuumaad cusub oo wareysi taariikh kale ah.

Mas'uulkaaga iyo qareenkaaga ayaa kula diyaarin doona wareysiga. **Ka hor wareysiga waxaa aad muhiim u ah inaad sida ugu badan u soo arruursato xog iyo qoraalo si aad u caddeyso aqoonsigaaga, da'da, safarka, sababaha magangelyo, iyo meelaha ku habboon, goobaha kala duwan ee ay deganyihiin xubnaha kale qoyskaaga.** CGRS waxay u baahantahay xogtaan si ay baaritaan ugu samayso codsigaaga magangelyo sida ugu habboon oo ugu dhaqsaha badan. Mas'uulkaaga iyo qareenkaaga ayaa kaa caawin doona.



Wareysiga wuxuu ka dhici doonaa CGRS, **qol si gaar ah loogu talagalay** da'yarta.



Haddii aadan ku hadlin Nederlaan ama Faransiis, **turjubaan** ayaa kuu fasiri doona. Turjubaanka waxa uu u joogaa oo kaliyah sidii adiga iyo wareystaha aad isugu fahmi lahaydeen sida ku habboon. Turjubaanku inaba ma soo faragelin doono baaritaanka codsigaaga. Turjubaanka iyo wareystaha waa inay ixtiraamaan **sirta xirfada**, si lamid ah xafiiska socdaalka.

**Qof aad ku kalsoontahay** wuu kugu wehelin karaa muddada wareysiga. Kani waa qof aad ku kalsoontahay oo kuula shaqeynaya hab-xirfadeed ahaan sida (Cilmi-nafsiyahan, macalin ama shaqaale bulsho...).



## MAXAAD KA FILAN KARTAA MUDDADA UU WAREYSIGA KA SOCDO CGRS?

Wareystaha ayaa ka mas'uulka ah wareysiga. wuxuu meesha u joogaa in uu adiga ku dhageysto.

Muddada lagu guda jiro wareysiga. Wareystaha ayaa waxa uu ku waydiin doonaa su'aalo. U sheeg dhamaan wixii aad taqaano oo ku saabsan naftaada, dhibaatooyinkaaga, dhibaatooyinka quseeya dadka kugu dhaw. Wuxuu wax kaa waydiin doonaa waraaqahaaga iyo safarkaagii Biljim.

Haddii **aadan fahmin su'aal** ama wax dhib ah uu yimaado inta lagu guda jiro wareysiga, waxaa muhiim ah inaad isla markiiba u sheegto qofka ku wareysanaya.

Tani wa si la isaga ilaaliyo qalalaad, looguna oggolaado wareystaha in uu su'alaha dib ugu habbeeyo.

Haddii **aadan aqoon jawaabta suaal**, waxaad tirahdaa ma aqaano, ha abuurin jawaabo. waqtigaaga qaado si aad uga fekerto wixii aad rabto inaad sheegto.

**Daacad noqo, sheegna dhamaan wixii aad taqaano.**

Maadaama laga yaabo in wareysigu uu qaato dhawr saacadood, waxaa jiri doona nasiino joogto ah. Haddii aad u baahato nasasho inta lagu jiro wareysiga, waad waydiisan kartaa mid.

**Mas'uulkaaga** wuxuu sidoo kale **bixin karaa faallo** inta uu wareysigu socdo.

Wareysiga kaddib, waxaad weli ku darsan kartaa **macluumaad ama waraaqo** faylkaaga magangelyo. Mas'uulkaaga ama qareenkaaga ayaa arrintan kaa caawin doona.





## MUXUU KAA FILAN KARAA WAREYSTAHAINTA LAGU GUDO JIRO WAREYSIGA?

Si go'aan looga gaaro codsigaaga magangelyo, CGRS waxay u baahantahay warbixinada la heli karo. Sharci ahaan waa waajib in aad muujiso wadashaqeyn. Wareystaha wuxuu kaa rajeynayaa waxyaabaha soo socda :

- Sheeg **runta**. Bixi jawaabo **daacad ah**, oo ay la socoto **faahfaahinta ugu badan oo ugu macquulsan**.
- Haddii ay macquul tahay, Tus **waraaqo** aad ku caddeynayo:
  - da'daada
  - aqoonsigaaga
  - jinsiyadaada
  - taariikh nololeedkaaga
  - meesha aad degantahay (iyo meelihii markii horeba)
  - aad ku noolayd iyo xubnaha qoyskaagaba
  - safarkaagii Biljim
  - dhibooyinkii aad kula soo dhibaatootay wadankaaga.

Haddii CGRS ay hesho inaad sheegtay **hadalo aan sax ahayn oo been abuur** ah ama aad dhiibto warqado been ah, waxaa dhici karta in codsigaaga la diido. Haddii CGRS ay oggaato tani kaddib markii lagu siiyay badbaado caalamiga ah waa ay kaala noqon kartaa sharciga, tani waxa ay sidoo kale cawaaqib xun ku yeelan kartaa qof kasta oo kamid ah qoyskaaga ah oo Biljim ku yimid dib u middoobida qoysaska iyadoo lagu salaynayo sharciga badbaadada ee lagu siiyey.

Haddii aadan ka bixin xaaladaada dhabta ah ee hoose ama aad si ku filan u sharaxi waydo sababta aadan u bixin Karin macluumaad, CGRS awood uma lahan inay samayso qiimeyn ku habboon cabsida aad ka qabto in lagu ciqaabo. Tani waxa ay sidoo kale horseedi kartaa in la diido codsigaaga.





# BAARITAANKA CODSIGAAGA MAGANGALYO-DOONKA

---

Kaddib marka wareysiga lagula yeesho, wareystaha waxa uu **baaritaan** ku samayn doonaa codsigaaga magangelyo. Si loo sameeyo sidaan, isaga ama iyada waxa ay eegaysaa kuwa soo socda:

- macquul ahaanshaha sheekadaada magangelyo
- waraaqaha iyo caddeymaha kale ee aad soo gudbisay si aad ugu xaqiijiso sheekadaada magangelyo
- xaalada guud ee waddankaaga ama waddankii aad deganayd
- sifada gaarka u ah dacwaddaada. CGRS waxa ay baaritaan ku samaysaa codsi kasta oo magangelyo si gaar ah iyo qiimeyn ay ku samayso cabsida shaqsi ahaan aad ka qabto haddii ay timaado dib u laabasho iyo haddii ay leedahay sal adag.

CGRS waxa ay ku xisaabtamaysaa dá daada, baaluqnimadaada, heerka iskuulka iyo baahiyaha gaarka ah.


**Danta ugu wanaagsan ee ilmaha iyo nugeyl ahaanshaha cunuga** ayaa muhiim u ah go'aan qaadashada codsiga magangelyo. Carruurta uma arkaan dunnida ku xeeran si lamid ah dadka qaangaarka ah, waxa ay u fasirtaan xaqiiqooyinka iyo dhacdooyinka gaarka u ah carruurta. Sidaan daraadeed CGRS kaama filanayso adiga inaad suaal walba aad uga jawaabto si qayaxan.

Haddii loo baahdo ama ay macquul tahay, CGRS waxaa laga yaabaa inay wareysi ku casuunto **markhaatiyaal** (tusaale ahaan, adeer ama eedo ku nool Biljim) si loo qeexo xaaladaada.

Ugu dambeyn, si loo baaro codsigaaga magangelyo, CGRS waxa ay isticmaalaysaa xogta wadanka oo ay kamid tahay xaalada carruurta iyo dá'yarta ee ka jirta wadankaaga.



# GO'AANKA KU SAABSAN CODSIGAAGA MAGANGELYO



Muddo kaddib wareysiga. Waxaad CGRS ka helayaa go'aan. Go'aanka asalka ah waxaa loo dirayaa mas'uulkaaga. Qareenkaaga wuxuu helayaa nuqul. Waxaad helayaa nuqul kamid ah go'aan oo lagu soo dirayo boostada cinwaankaaga ama fakiska xarunta soo dhaweynta. Go'aanka guddiga guud wuxuu ku qoranyahy luuqad lagu saleeyay da'daada iyo taariikh nololeedkaaga.

Haddii aad hesho go'aan diidmo ah, qareenkaaga iyo shaqaalaha daryeelka ayaa kuu sharaxaya sababaha keenay in lagu diido.

## Sii Ogoow Inbadan



Iyadoo lagu xisaabtamayo dhamaan waxyaabaha ku jira faylkaaga magangelyada ayuu Guddiga Guud kaa qaadanayaa go'aan oggolmaansho ah (Siismo sharciga magangelyada) ama go'aan diidmo ah (Diidmo lagu diiday in lagu siiyo sharci magangelyo dhawr nooc oo go'aano ah ayaa macquul ah. Sii akhri [www.cgrs.be/en/asylum/types-decisions](http://www.cgrs.be/en/asylum/types-decisions)



## DIIDMO: CGRS WAY DIIDAY CODISGAAGII MAGANGELYO. MAXAA XIGGAYA?

CGRS waxay qaadatay go'aan laguugu diiday sharciga qaxootiga iyo sharciga badbaadada dhiman. Ma jiraan waxyaabo saldhig adag leh oo caddeynaya cabsi la xiriirta saxariirin ama khatar dhab ah oo ku aadan waxyeelo ba'an haddii aad dib ugu laabato dalkaaga. CGRS waxay qeexaysaa sababta ay u qaadatay go'aan noocaas ah.

### RACFAAN KA DHAN AH GO'AAN DIIDMO AH

Miyeey CGRS kuu diiday inay ku siiso sharciga qaxootinimada ama sharciga badbaadada dhiman? Ama miyaad heshay sharciga badbaadada dhiman laakiin miyaad doonaysaa in lagu aqoonsado qaxooti? Kiisaskaan oo kale, waxaad **racfaan** ka qaadan kartaa go'aanka diidmada ah. Racfaankaan waa in laga sameeyaa guddiga cadaalada ee ajnabiga. Mas'uulkaaga iyo qareenkaaga ayaa kaa caawin doona tan.

Waxaad xaq u leedahay inaad joogto Biljim inta lagu gudo jiro racfaanka ilaa inta aad ka gaarayso 18. Haddii racfaankaaga la diido, waa in aad wadankaagii ku laabato markii aad 18 noqoto.

#### Sii Ogoow Inbadan

Golaha dacwadaha sharciga ajnabiga (CALL) wuxuu go'aan ka gaaraysa racfaanada go'aanada diidmada ah ee ka yimaada CGRS. Waxaa jira noocyo kale duwan oo nidaamyada racfaanka ah, waxa ay ku xirantahay nooca go'aanka. CALL waxa ay soo saaraysaa xukuno oo ay raacsanyihiin sababayn faahfaahsan. Ka sii akhri in badan:

[www.cgrs.be/en/international-protection/appeals-procedures](http://www.cgrs.be/en/international-protection/appeals-procedures)



# OGOLLAANSHO: WAXAA LAGUU AQOONSADAY QAXOOTI AHAAN

Go'aanka lagu aqoonsado sharciga qaxootinimada: CGRS waxa ay kuu aqoonsaday qaxooti ahaan.

## MUXUU YAHAY SHARCIGA QAXOOTINIMADA?

Waxaad helaysaa ruqsad deganaansho oo bilaw ah oo kuu oggolaanaysa inaad joogto Biljim 5 sano. Markii aad hesho oggolaanshahan, xubnaha qoyskaaga waxa ay codsan karaan dib u middoobida qoyska.

Waxaad helaysaa **caddayn qaxootinimo** muddo 30 maalmood kaddib go'aankaga. Shahaadada waxaa toos kuugu soo diraya CGRS. Haddii aad u baahantahay warqadaha sharciga madaniga ah (tusaale ahaan shahaado dhalasho) waxaad u gudbin kartaa the “Miiska caawinta ee qaxootiga la aqoonsaday iyo dadka aan dalalka lahayn ee ku yaalo CGRS. Baasaboorka socdaalka ee qaxootiga waxaad ka doonan kartaa maamulka gobolka ee meesha aad degantahay. Mar haddii lagu aqoonsaday qaxooti laguuma ogola in aad u socdaasho wadanka aad isir ahaan ka soo jeedo?

### Sii Ogoow Inbadan

Markii lagu aqoonsado qaxooti sharciga Biljim ayaa ku qabanaya. Waa inaad raacdo sharciyada ay raacaan muwaadiniinta Biljim. Faahfaahin dheeraad ah oo la xiriirta xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga iyo waraaqaha aad ka heli karto CGRS markii lagu aqoonsado qaxooti waxaad ka heli kartaa: [www.cgrs.be/en/international-protection/refugee-status](http://www.cgrs.be/en/international-protection/refugee-status) [www.cgrs.be/en/documents](http://www.cgrs.be/en/documents)



# OGGOLAANSHO: WAXAA LAGU SIIYAY SHARCIGA BADBAADADA DHIMAN

Go'aan laguugu diiday sharciga qaxootinimada, waxaana lagu siiyay sharciga badbaadada dhiman: Ma jiraan xubno ku filan in lagu aqoonsado qaxooti laakiin, maadaama aad khatar dhab dhibaato ba'an ah wajahayso, kuma laaban kartid wadankii aad ka soo jeeday waqti xaadirkan.

## WAA MAXAY SHARCIGA BADBAADADA DHIMAN?

Marka hore waxaad helaysaa deganaansho bilaw ah oo 1 sano ah. Tani waa lagu sii kordhin karaa. Qoyskaaga waxay dalban karaan dib inay kuula middoobaan.

CGRS ma siiso waraaqaha xaaladda bulsho kuwa haysta sharciga badbaadada dhiman. Haddii aad rabto inaad u socdaasho dibadda caadi ahaan waa inaad isticmaasho baasaboortu u kuu soo saaray wadankaaga.

### Sii Ogoow Inbadan



Qaar ka mid ah sharciyada dalka uu asal ahaan ka soo jeedo da'yarka waxa ay raacayaan ka fa'a iidaystaha sharciga badbaadada dhiman, tusaale ahaan sharciyada ku saabsan aqlabiyada sharciga ah iyo ansaxnimada guurka ah. Faahfaahin dheeraad ah, waxaad tagtaa [www.cgrs.be/en/international-protection/subsidiary-protection-status](http://www.cgrs.be/en/international-protection/subsidiary-protection-status)

Waan xasuustaan!

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....



HAGAHA CARRUURTA AAN LALA SOCON

# Xiriir

---

## COMMISSIONER GENERAL FOR REFUGEES AND STATELESS PERSONS

Rue Ernest Blerot 39

1070 BRUSSELS

Tel: 02 205 51 11

Dalka dibadiisa fadlan soo wac +32 2 205 51 11

Fakis: 02 205 50 01

E-mail: [cgvs.info@ibz.fgov.be](mailto:cgvs.info@ibz.fgov.be)

Website: [www.cgrs.be](http://www.cgrs.be)

## QAYBTA DA'YARTA EE CGRS

CGRS waxay leedahay isuduwe da'yarta qaabilsan. Isuduwaha waa uu la socdaa wax walba oo la xiriira codsiyada magangelyada ee da'yarta ajnabiga ah ee aan la wehelin. Waxay si dhaw ula soconaysaa dhamaan codsiyada noocan oo kale ah. Wakiilada doonaya suaalo ama inay wax ka oggaadaan nidaamka magangelyada waxay la xiriiri karaan isuduwaha da'yarta.

E-mail: [CGRA-CGVS.Mineurs@ibz.fgov.be](mailto:CGRA-CGVS.Mineurs@ibz.fgov.be)

Tel: 02 205 53 06

Dalka dibadiisa fadlan soo wac +32 2 205 53 06

Fakis: 02 205 50 05

Maadaama ay tahay ergo magangelyo doon oo dhexe oo madax-bannaan, CGRS waxay xiriir joogto ah la leedahay saaxiibo Biljim, reer Yurub iyo caalamiba ah.

Sii akhri: [www.cgrs.be/en/partners](http://www.cgrs.be/en/partners)



Ma doonaysaa  
inaad in badan  
ka oggaato  
**CGRS?**

Waxaad Tagtaa  
websitekeena:  
**[www.cgrs.be](http://www.cgrs.be)**



HAGAHA CARRUURTA AAN LALA SOCON



Office of the Commissioner General for  
Refugees and Stateless Persons (CGRS)

[www.cgvs.be](http://www.cgvs.be)



[www.asyluminbelgium.be](http://www.asyluminbelgium.be)



Rue Ernest Blerot, 39  
1070 BRUSSELS  
Belgium